**Hab**
Fairview Health Services (Adeegyada Caafimaadka ee Fairview)

**Siyaasad**

# Xeerka Caawimada Dhaqaalaha

*Kobiyada daabacani kaliya waa tixraacyo. Fadlan tixraac koobiga elektoroonniga ah u dambeeyay.*

**Ujeeddo:**
Adeegyada Caafimaadka Fairview and HealthEast (wadajir ahaan), “Fairview”) waxay leedahay taariikh dheer oo siisa daryeel caafimaad oo tayo leh bukaannada bulshadeenna si kasta oo ay tahay awoodooda iska-bixinta qarashka. Fairview waxay aqoonsan tahay in bukaanka qaar laga yaabo inaanay awoodin inay bixiyaan dhammaan ama qayb kamid ah qarashka adeegyada daryeelka caafimaad ee lagama-maarmaanka ee la siiyay sababta oo ah ma aysan lahayn caymis caafimaad ama sababtoo ah qarashkooda daryeelka caafimaad ayaa ka sarreeya awooddooda-bixineed. Si loo siiyo Daryeel Samafal ee ku habboon ama kaalmo dhaqaale oo kale la siiyo dadka u baahan, Fairview waxay leedahay hab lagu qiimeeyo u -qalmitaanka bukaanka ee Daryeelka Samafalka ah.

**Qoraalka Siyaasadda:** Fairview waxaa ka go'an inay hormariso caafimaadka bulshada. Siyaasaddani waxay quseysaa qaybaha kala duwan ee siyaasadda kaalmada maaliyadeed ee Fairview.

**Qeexitaanno:**

**Baahi Caafimaad**
Daryeelka lagama-maarmaanka caafimaad ahaan waa daryeel sida ra'yiga takhtarka/takhtarka daaweynta laga aqoonsan yahay Fairview yahay iyo sida daryeelka halbeegga ahi yahay, waaka ilaa in macquul ah loogu baahan yahay:

- Si looga hortago bilawga ama kasii-daritaanka jirrada, xaaladda, ama naafannimada;
- Si loo sameeyo falanqaynno;
- Si loo dejiyo, daaweeyo ama loo siiyo daaweyn dhaqan-celina oo xagga jirka, anshixa iyo/ama xaaladaha caafimaad dhimireedka, iyo/ama
- Si looga caawiyo qofka inuu gaaro ama uu u joogteeyo awoodda wax-qabad ee fulinta hawlo maalmeedka, iyadoo la tixgelinaayo awoodda wax-qabad ee qofka iyo awoodaha shaqaynaaya ee ku habboon dadka isku da'da yihiin.
- Adeegyada lagama-maarmaanka caafimaad ahaan waxaa kamid ah adeegyada bukaanka jiifa iyo bukaanka socotada sida lagu waajibiyey Sharciga Ammaan Bulsheedka ee Federaalka ee Cinwaanka XVIII, iyo adeeg isbitaalleedka bukaanka jiifa ama socotada ee caymiska ku jira oo loo tixgelo lagama-maarmaan caafimaad ahaan Sharciga Ammaan Bulsheedka Fedaraalka ee Cinwaanka XVIII. Sidoo kale, daryeelka ay ku bixiyaan xarunta isbitaal cida iskaashiga la leeyahay ama LLC e mulkiilaha isbitaalka raasamaalkiisa ama faa'idadiisa ay u qalanto kaalmo dhaqaale. Adeegyada waa in loo bixiyaa si waafaqsan heerarka qaran ee nidaamka caafimaad ee guud ahaan la ogol yahay wakhtiga la bixinayo adeegyada. Adeeg kasta waa inuu ahaado mid ku filan qaddar ahaan, muddo, iyo baaxad si macquul ahaan loo gaaro ujeeddadeeda.
- Adeegyada caafimaad ahaan lagama-maarmaanka ah kuma jiraan faragelinno tijaabeed ama walxaha dabiiciga ee la isku qurxiyo.
- Xaaladaha kale ee taageeraya baahida caafimaad ee daaweynta gaar ahaaneed waxaa kamid ah:
    - Caddayn cilmiyeed tayo sare leh oo bukaannada qaba xaaladdaan gaar ahaaneed ay uga faa'iidaysan doonaan daaweyntii la codsaday;
    - Jaadka macaashku caafimaad ahaan waa muhim; iyo/ama
    - Daaweynno loo beddelan karo oo qarash yar iyo waddooyinka agaasinku wax ku tixgeliyo ama ku diido.

**Faragelinno Tijaabeed**
Faragellinno tijaabeed waa daaweynno iiyo faragelinno guud ahaan khubarada aagga laga hadlaayo ee faaqidaaya, kahortag samaynaaya ama daaweynaaya xaaladda caafimaad ee la tixgelinaayo aysan oggolaan inay tahay mid badqab leh ama waxtar leh. Marka go'aan laga gaaraayo in faragelintu tahay tijaabeed, qodobbo

quseeyaa ku jiraan laakiin waa

- in faragelintu kaliya lqeyb ahaan u diyaarsan tahay cilmi-baaris takhtareed;
- hadii maqaalada joornaalada lagu naqdiyo shaqada dadka isku xirfadlayaasha yahay lagu baaqo in daraasad dheeraad ah oo waxka qabadka mushkilada caafimaad loo baahan yahay; ama
- in haddii faragelinta loo adeegsan lahaa meelo jirka ah oo kala duwan, si muhim ahna u ah waddo duwan, iyo/ama loo la jeedo xaalad caafimaad oo ka duwan, tan sida caadiga khuburada kale ku oggolaadaan aagga quseeya [Fairview gudaheed, Twin Cities, Minnesota, US, iwm.]

**Culays Xasilooni-Daro Maaliyadeed**
Xaaladda ay jirto qarash badan oo ay ku taagan tahay hay'adda cashuurta laga dhaafay ee Fairview inay bixiso adeega iyo dhacdada baahida mustaqbal ee bukaanka ee adeegga ah qaab ayna hay'adu bixin karin adeeg isku mid ah iyada oo aan loo gudin dhammaan bukaanka ay isku xaaladda yihiin oo ay maaliyad ahaan ka mas'uulka yihiin.

**Qoys**
Ujeeddada siyaasaddaan, qoysku waa:

- Lammaane is qaba iyo cida laga masuulka yahay, sida lagu sheegy tilmaamaha IRS.
- Qofka leh cid uu ka mas'uulka yahay sida lagu sharraxay tilmaamaha IRS.
- Qof aan lahayn xaas oo cidna aan ka mas'uul ahayn.

Tilmaamaha saboolnimada ayaa lagu dabbaqi doonaa si loo kala saaro qoys kasta oo guri wada deggan haddii guriga ay deggan yihiin waxka badan hal qoys.

**Bixinta Daryeelka**
Fairview waxay bixinaysaa baaitaanno-marin iyo adeegyada xasilinta ee xaaladda caafimaad ahaan daruuriga ah ee caafimaadka ee degdegta ah iyada oo aan la eegin awoodda iska bixinta. (Eeg siyaasadaha HealthEast ama Fairview EMTALA.)

Fairview waxay bixisaa adeegyo aan xaalad degdeg ah ahayn, marka la eego fikirka dhakhaatiirta ay Fairview aqoonsan tahay, inuu caafimaad ahaan daruuri yahay. Fairview waxay dalban kartaa in lagu heshiiyo qaab loo bixiyo lacagta oo ay ku qanacsanaayeen kahor inta aan la bixin adeegyada xaaladda dgdegta ah. Heshiiska bixinta lacagta waxaa kamid noqon kara lacag caddaan ah ama k- bixinta kaarka daynta, caymiska nooc kasta oo ay aqbasho Fairview, qiimo-dhimista dadka bilaa caymiska ah, halka ay ku munaasabka tahay, kaalmada dhaqaale (qiimo dhimis ama daryeel bilaash ah) oo ay Fairview ansixisay. Adeegyada la doortaa waxaa dhici karta inayna u qalmin kaalmo dhaqaale. Xaaladaha aan degdegta ahayn, Fairview waxay xaq u leedahay inay dibu eegid ku samayso kiisaska qofka anaaneed ama ay dalbato adeegyo gaar ah si looga sameeyo  qaabka ugu habboon ee daawaynta ee dhanka caafimaadka iyo aragti dhaliileedka.

**Qiimo-Dhimista caymis-laawaha (Isbitaalada Fairview)**
Bukaannada isbitaalka qaata daawaynta bilaa caymiska sida lagu sheegey heshiiska Fairview iyo HealthEast ay kula jiraan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud laga bilaabo Juun 2017 ilaa Juun 2022 ("Heeshiis" wadajir ah) waxay u qalmaan qiimo-dhimis ("qiimo-dhimista caymis-laawaha").

I. U-Qalanka Qiimo-Dhimista:

A. Bukaanka aan caymiska lahayn ayaa la aqoonsan doonaa inta lagu jiro duwaan gelinta kahor, nidaamka duwaan gelinta ama qot=raalka, ama wakhti kale inta lagu jiro nidaam dalicidda kharashka iyo uruurinta. Bukaanka bilaa caymiska ah, oo ay ku jiraan, laakiin kuma koobna, dhamaan bukaanka bilaa cayiska ah ee qoyska dhakhligoodu u dhigmo ama uu ka hooseeyo, $125,000, ee qaatay daawaynta ay u baahnaayeen waxay u qalmaan qiimo dhimista bilaa caymiska ee Fairview ee xadiga ugu sareeya ee cida sida gaarka ah iskaga bixinaysa.

B. Ka-Reebidda Qiimo-Dhimista:
1. Bukaanka aan degganayn Minnesota ama Wisconsin waqtiga adeega u ma qalmayaan qiimo-dhimista caymis-laawaha.
2. Bukaan la siinayo adeegyada is-qurxinta, waxyaabo gaar ah, tijaabo ama caafimaad ahaan adeegyada aan daruuri ahayn uma qalmaan qiimo dhimista caymis-laawaha.
3. Qiimo dhimista caymis-laawuhu kaliya waxay qusaysaa adegyada isbitaalka iyo kuwa isbitaalka ku salaysan iyo adeegyada la siiyo dadka qaar u shaqeeya isbitaalka. Bukaanka la siiyo adeegyada xarunta caafimaadka iskood u taagan, adeegyada bixiyaha aan Fairview ahsyn, adeegyada hay'adaha

Fairview ee aan ku jirin Heshiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo adeegyada kale ee aan ahayn kuwa isbitaalka la ma siinayo qiimo dhimista caymis-laawaha.

II. Qiimo Dhimista qarashka La Isku Dallacaayo:

Heerka qiimo dhimista ayuu sheegi doonaa bilawga sanad kasta Madaxweyne Ku Xigeenka Maamulka Dakhlihgu. Qiimo dhimistu waxay ku salaysan tahay celcelis ahaan xaddiga gudista ee la siiyo cidda sida gaarka ah iskaga bixinaysa ee Fairview wixii adeegyo ku salaysan oo xagga isbitaalka. Hoggaanka Maaliyadda Goobta, Madaxweyne Ku-Xigeenka Maamulka Dhakhliga, iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Wareegga Dhakhliga ama cidda ay u wakiishaan waa inay ansixiyaan go'aammada ka baxsan wixii ku yaal tilmaamaa, kadib markay si wanaagsan u qiimeeyaan xaaladda kiis kasta.

**Siyaasadda dhaqaalaha**

Marka laga tago qiimo dhimista bilaa caymiska, Fairview waxay siisaa kaalmo dhaqaale adeegyada u qalma kuwaas oo ah qaab qiimo dhimis la siinayao shakhsiyaadka buuxiya shuruudaha u-qalanka. Daryeelka xaaladda degdegta ah iyo adeegyada aan degdega ahayn ee uu diray dhakhtarka ay aqoonsan tahay Fairview in, dhakhtarka dirayaa uu u arko, caafimaad ahaan ay daruuri tahay, oo ay u qalanta kaalmo dhqaale, maadaama oo ay tahay daryeel lagu bixiyo xarunta isbitaalka iyada oo saami ku leeyahay ama ah LLC oo isbitaali ku leeyahay saami ama faa'ido.

Bixiyaha kale oo bilaa shaqada ee ku bixiya caafimaad degdega ah ama daryeelka kale ee aan caafimaadka ahayn goob isbitaal ah waxay ku qoran yihiin Siyaasaddaan Kaalmada Dhaqaale. Lifaaqa ayaa sharraxaya hadii daryeelka ay bixisay cidda kale oo soo hoos galaysa Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale.

Fairview waxay xaq u leedahay inay naqdido dalabyada kaalmada dhaqaale ee wixii adeegyo xaalad degdg ah ahayn si ay u eegto daawayn kale ama adeega goobta iyo in la diido dalabka kaalmada dhaqaale ee kenaya culayska dhaqaale hay'ada.

Bukaanka ka hela daryeelka Fairview waxaa looga fadhiyaa inay qaybtooda bixiyaan qarashka daryeelkooda inta ay awoodaan inay bixiyaan. Kaalmada dhaqaale ee Fairview ma bulsho kafaale qaadida cida loo shaqeeyo, iibsiga caymiska uu qof qof ama dadweynuhu iibsaday. Si loogu qalmo kaalmada dhaqaale, bukaanka waxaa looga fadhiyaa inay:

- Helaan ikhtiyaaro caymiska shacabka ama gaar ah oo ay u qalmaan, oo ay ku jirto inay bixiso Fairview wixii macluumaad ah ee ku biiridda barnaamijka caymiska ee dawladdu kafaale qaadday.
- In loo hoggaansamo shuruudaha arjiga kaalmada dhaqaale, oo ay ku jirto soo-saarka waraaqaha loo baahan yahay.

**U-Qalanka Kaalmada Dhaqaale**

Fairview waxay ku salaysaa u-qalmidda caawinada dhaqaalaha dakhliga soo gala qoyska iyo hantidooda maguurtada ah. Foomka codsiga caawinada dhaqaalaha waa in la soo raaciyaa foomka xaqiijinta dakhliga iyo hantida maguurtada ah ee qoyska. Xaqiijinta la aqbali karo ee dakhliga iyo hantida maguurtada ah waxaa ka mid ah waxyaabaha soo socda ee dhammaan dadka waawayn ee qoysku leeyihiin: Risiidyada mushaharka ee bishii ugu danbaysay, cadaymaha qarashka ee muujinaaya gunooyinka Social Security, shaqo la'aanta, naafanimada iyo taageerada xaaska/carruurta, cadaymaha dakhliga soo gala koontada baanka iyo dilaalka (ee kaashka ama kaydka hantida), iyo canshuur celintii ugu danbaysay ee sannadka. Caddaynta dakhliga soo gala codsadayaasha iskood u shaqeysta ayaa loo baahan yahay. Markaanad lahayn wax dakhli ah, Caddaynta Sheegaysa inaan Dakhli qofku helin ayaa la aqbali doonaa.

Tilmaamaha dakhliga waxaa la naqdin doonaa iyada oo la egayo Tilmaamaha Saboolnimada Federalka ee ay baahisay Xarunta Adeegyada Medicare iyo Medicaid. Tilmaamaha dhakhliga ee kaalmada dhaqaale ee u qalanta ee Fairview waa sida soo socota:

| Dhakhliga qoyska ee ah % Tilmaamaha Saboolnimada Federalka | % Qiimo-dhimista wadarta guud. qarashka (Baaqiga kadib Qiimo Dhimista Bilaa Caymiska) |
|---|---|
| 0-200% | 100% |
| 201%-300% | 50% |

Tilmaamaha hantida ee kaalmada dhaqaale ee u qalanta ee Fairview waa sida soo socota: Haddii qoyska isugayn xisaabta bangiga, saami, iyo wadarta hawlgabka uu haystaa ay ka badan tahay $500,000 uma qalmaan markaa Kaalmo Dhaqaale.

Fairview ma isticmaalaan sooftiweer lagu qiyaasayo u qalanka si ay ugu ogolaadaan ama ugu diidaan kaalmada dhaqaale bukaanka. Wixii bukaan ah ee la ogaado inuu iminka u qalmo Kaalmada Dhaqaale ama Daryeela Minnesota (wadajir ah "MA"), wixii bukaan ah ee baaqi lagu lahaa kahor taariikhda bilawga MA ayaa u qalmaya kaalmada dhaqaal.

**Ka Shaqaynta Arjiga Kaalmada Dhaqaale**

- Fairview waxay siin doontaa latalin dhaqaale bukaanka iyo qoysaskooda si looga caawiyo inay ogaadaan ikhtiyaarka ku haboon ee ay ku buuxin karaan waajibaadka dhaqaale. Bukaanka muujiyay xaalad dhaqaale oo qalafsan ayaa lasiin doonaa arjiga kaalmada dhaqaale.
- Si uu u dalbado kaalmada dhaqaale, qofku waa inuu buuxiyaa arjiga kaalmada dhaqaale oo uu bixiyaa waraaqaha oo baahan yahay ee ku saabsan dakhliga qoyska iyo hantida (hoos ka eeg). Arjiga gargaarka maaliyadeed waxa lagu heli karaa lacag la'aan iyadoo la wacayo Adeegga Macaamiisha HealthEast 651-232-1100, Adeegga Macaamiisha Fairview 612-672-6724 ama Adeegga Macaamiisha ee Fairview Range 218-362-6624. Wixii caawimaad arjiga ah waxaa laga heleyaa iyada oo lala hadlaayo lambaradaan sidoo kale..

Bukaanka aan marka hore muujin in aanu awoodin inuu iska bixiyo waxa uu la xidhiidhi karaa Adeega Macmiilka HealthEast, Adeegga Macmiilka Fairview ama Adeega Macmiilka Fairview Range kadib marka kharashka lagu dalaco, La Taliye Dhaqaale ayaa la xidhiidhi kara bukaanka. Wakiil Adeega Macmiilka ah ayaa u gudbin doona bukaanka shaqaalaha ku munaasabka ah si uu u dalbado wixii barnaamijyo kaalmo shacab ah iyo eegitaanka in bukaanka uu u qalmo kaalmo dhaqaale. Dadka u qalma kaalmada dhaqaale waxaa la siin doonaa foomka arjiga.

- Foomka arjiga la buuxiyay waxaa loo diri doonaa isku duwaha Daryeelka Samofalka.
- Haddii arji aan dhameystirnayn loo soo diro Fairview, warqad ayaa loo diri doonaa qofka mas'uulka ah taas oo sharaxaysa waxa loo baahan yahay.
- Fairview waxa siin doontaa wargelin ah kaalmada ay la diyaarka tahay 30 maalmood gudahood marka uu soo gaaro arjiga kaalmadu. Wargelintaan waxaa kamid ah heerka hoos loogu dhigaayo joogto la'aanta awooda iska bixinta bukaanka. Faahfaahinta waxaa ku jira sababta diidmada iyo tilmaamaha nidaamka bukaanku uu ku dalban karo dib u eegida. Go'aanka u-qalanka kaalmada dhaqaale waxa uu shaqaynayaa (waxa uu khuseeyaa daryeelka la bixiyay ee sida kale u buuxinaya shuruudaha siyaasadan) mudo 6 bilood ah oo looma baahna in dib loo dalbado.
- Bukaanku waxa uu dalban karaa dib u eegid go'aanka u-qalanka ah ee kaalmada dhaqaale ee Fairview isaga oo kusoo gudbinaya qoraal macluumaad dheeraad ah, sida xaqiijinta dhakhliga ama sharaxa xaalad gaar ah, cida u qaabilsan ansixinta 30 maalmood gudahood wargelinta diidmada. Haddii hore loo diiday u-qalanka kaalmada dhaqaale oo lagu celiyo, wargelin qoraal ah ayaa ka masuulka ah loo dirayaa. La-socodka soo-aruurinta xisaabaha waa la joojin doonaa inta uu socdo nidaamka dibu-eegiddu.
- Qiimo dhimista Kaalmada Dhaqaale waxaa lagu dabaqi doonaa baaqiga xisaabta la ansixiyay kadib arjiga qiimo dhimista aan la ansixin haddii bukaanku uu u qalmo sida uu dhigayo Heshiisku. Kuwa soo socda waxaa lagu ogaadaa u qalanta kaalmada dhaqaal, shakhsia u qalma kaalmada dhaqaale laguma dalici doono wax ka badan caadiga ah ee laga qaado (AGB) shakhsiyaadka leh caymiska xaalada degdega ah ama daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah. AGB waxaa loo xisaabiyaa isbitaal kasta oo isticmaala qaabka dibu-jaleecidda lacagta guditaanka ah ee laga helay dhammaan xisaabaadka dhaqaale iyo Medicare ee sannad xisaabeedka hore. Xaashi macluumaad oo sheegeysa xaddiga boqolkiiba ee guud ahaan ay Fairview ka heli karto qarashka uu qaado marka lala xiriiro Adeegga Macmiilka Fairview ee 612-672-6724 ama Adeegga Fairview Ranger ee 218-362-6624.

Bukaanka ayaa mas'uul ka ah qarash kasta oo soo hara kadib marka loo sameeyo qiima dhimista caawinada dhaqaalaha. Haddii aan baaqiga lagu bixin mudada loo asteeyay, lacagta waxaa lagu soo aruurin doonaa habraaca caadiga ah ee qarash aruurinta, kaasoo lagu qeexay Xeerka Qarash Dalbashada iyo Aruurinta ee Fairview, oo laga heli karo halkanwww.Fairview.org. Fairview ma samayso ama u ma oggolaato wakiiladeeda inay sameeyaan farsamooyin lacag aruurin oo xadgudub ama sharci darro ah.

**Daabacaada Helitaanka Kaalmada Dhaqaale**
Fairview waxay bulshada ku wargalin doontaa xeerkeeda caawinada dhaqaalaha ayadoo adeegsanaysa qaabab kala duwan, sida inay soo daabacdo xeerka caawinada dhaqalaaha, foomka codsiga caawinada dhaqaalaha, iyo xogta kooban ee luuqada fudud lagu qoray ee xeerka caawinada dhaqaalaha oo ay ku soo daabacayso bogga internetka ee Fairview (www.Fairview.org ), ayna ku jiraan xogta kooban ee luuqadda fudud ku qoran ee xeerka caawinada dhaqaalaha, abuurista xogta elektarooniga ah (markuu bukaanku oggolaado) ama daabacan oo ay bukaanadu ka heli karaan goobaha dadweynaha u furan ee gudaha isbitaalka iyo in lagu diro boostada ama iimeylka (ayadoo la kaashanaayo oggolaanshaha bukaanka), in lagusoo dhajiyo boorarka bulshadu arki karto ee qolka xaaladaha degdega ah iyo meelaha dadka isbitaalka lagasoo galiyo, iyo in lagu daro bayaanka qarash dalbashada ee bukaanka. Fairview waxay u sheegi doontaa ayna ogeysiin doontaa xubnaha bulshada ee adeegyada ku helay xeerka caawinada dhaqaalaha ee Fairview ayadoo adeegsanaysa boggeeda internetka, waraaqaha wararka, iyo ayadoo qaybinaysa waraaqaha xogta caawinada dhaqalaaha ee la siinaayo xubnaha bulshada ayadoo lagu bixinaayo Xarumaha caafimaadka ee Fairview.

**Daryteelka Samofalka/Dibu-Heeraynta Caawimada dhaqaalaha.**
Fairview waxay go'aamin kartaa inayna ka goosan lacagta xisaabta baaqiga bukaanta taas oo ku salaysan ilaa inta aanu bukaanku iska bixin karin ee lagu ogaaday nidaamka uruurinta caadiga ag. Marka uu go'aanku dalbadashada lacagty ay ku salaysan tahay dhaqaale xumada bukaanka, baaqiyadan waxay dib u qaybin doona Fairview taas oo ah kaalmo dhaqaale ama daryeelka samofalka, iyada oo uu ansixiyaya Maamulaha Nidaamka ee Wareega Dhakhliga ama cida uu u wakiisho.

**Kharashaadka Ka Badan Inta Dawladu Gudayso**
Qarashyada aan la kaabin ee laga helo Medicare, Medicaid iyo barnaamijyada daryeelka gobolka/deegaanka waxaa lagu daraa gunada bulshada maadaama ii u dhaxeyo farqi wayni qarashka rasmiga ah iyo inta la gudayo.

**Barnaamijka Daryeelka Samofalka**

- Jaantuska A waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan u qalanka Daryeelka Samofalka.
- Jaantuska B waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan been abuurka macluumaadka.
- Jaantuska B waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wada shaqaynta iyo isticmaalka caymiska.
- Jaantuska B waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha aan ku jirin Daryeelka Samofalka.
- Jaantuska B waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ikhtiyaarada kale ee qiimo dhimista.
- Jaantuska B waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ee uruurinta lacagta.

# Xeerka Caawimada Dhaqaalaha Jaantuska A

**U-Qalanka Barnaamijka Daryeelka Samofalka**

- Kaliya adeegyada xaaladda degdegta ah iyo daruuriyaadka caafimaadka ayaa u qalmo Daryeelka Samofalka. Fairview waxay xaq u leedahay inay kiis-kiis u go'aamiso haddii adeegu uu buuxinayo sharraxa "daruuriyaadka caafimaadka" ee ujeeddadiisu tahay u qalanta Daryeelka Samofal.
- Si aad ugu qalanta Daryeelka Samofalka, bukaanku waa inuu buuxiyaa shuruudaha dhakhliga iyo hantida sida soo socota:
    1. Heerka Dhakhliga: Bukaanka marka la isku daro dakhliga qoyska ee sanadkii waa inuu noqdaa 300% ama ka hooseeyaa Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level, FPL).

**Xadka Dakhliga ee Baaxadda Qoyska**

| Baaxadda Qoyska | Isugayn Dhakhliga Sanadkii (200% FPL) | Isugayn Dhakhliga Sanadkii (300% FPL) |
|---|---|---|
| 1 | $25,760 | $38,640 |
| 2 | $34,840 | $52,260 |
| 3 | $43,920 | $65,880 |
| 4 | $53,000 | $79,500 |
| 5 | $62,080 | $93,120 |

    2. Tilmaamaha hantida ee kaalmada dhaqaale ee u qalanta ee Fairview waa sida soo socota: Haddii qoyska isugayn xisaabta bangiga, saami, iyo wadarta hawlgabka uu haystaa ay ka badan tahay $500,000 uma qalmaan markaa Kaalmo Dhaqaale.
    3. Tafatirrada la xiriirta caddeymaha loo baahan yay si loo xaqiijiyo dakhliga iyo hantida waxa laga hoos heli karaa "Hanaanka Arjiga"

- Xisaabinta Dakhliga:
    - Ku socota dadka waaweyn, erayga "Dakhliga Guud ee Sannadkii" ee ku qoran Codsiga Deeqda Daryeelka waxaa looga jeedaa isku-darka dakhliga guud ee sannadkii soo gala codsadaha iyo xaaska codsadaha kanasoo gala dhammaan ilaha dakhliga. Haddii codsaduhu yahay ilmo yar, erayga "Dakhliga Guud ee Sannadkii" waxaa looga jeedaa dakhliga guud ee sannadkii soo gala waalidka

codsadaha iyo/ama mas'uulka sharciga ah ee ilmaha. Tirada "Dakhliga Guud ee Sannadkii" ee loo adeegsado Codsiga Deeqda Daryeelka waxaa looga jeedaa dakhliga la qoray ee lagu dhisay sannadka oo ah muddo 12 bilood. Cadaynta dakhliga ugu yar ee halkii bil ee ugu danbaysay ayaa la codsan doonaa si loo xisaabsho dakhliga sannadka hadda socda. Haddii aan la heli karin bishii ugu danbaysay ee cadaynta dakhliga, bukaanka ayaa sheegi kara cadadkii ugu danbeeyay ee wadarta guud ee la qoray isugayn dakhliga sanadkii. Daryeelka Samofalka lama bixini karo hadii bukaanku uu ka helo cid kale kaalmo dhaqaale oo la xidhiidha daryeelka ay bixiso Fairview oo uu ku filnaan waayo dalabka taagan ee deeqda la filanayo in la adeegsado si oogu bixiyo baaqiga ay Fairview ku leedahay bukaanka. Bukaanka dalbanaya Daryeelka Samofalka waxay uu sheegi doonaa tirada dadka ee guriga qoyska ku nool si loo ogaado cabirka qoyska, dhkhliga, iyo hantida sida soo socota:

Dadka waawayn: Marka la xisaabinayo tirada dadka waawayn ee qoyska dalbadaha, Fairview waxay ku dartaa dalbadaha, xaaska dalbadaha, iyo cid kasta oo sharciyan ay ka masuul yihiin.

Caruurta Yaryar: Waxaa lagu xisaabiyaa tirada dadka caruurta yaryar ee qoyska dalbadaha, Fairview waxay ku dartaa dalbadaha, dalbadaha aabihii/koriyahaya, hooyadii/koriyaha, iyo wixii kale ee cid ah ee ku tiirsan aabaha, hooyada ama ilmaha yar.

Waalidka la degan guriga caruurta waawayn laguma tirinayo cabirka qoyska ama dhakhliga ilmaha iyada oo la helo moojee cadayn korin/badal sharci ah oo waraaqo rasmi ah.

# Siyaasad Caawimaadda Dhaqaalaha Jaantuska A

**Been-Abuurka Macluumaadka**

- Been-Abuurka Macluumaadka:
    - Been-Babuurka macluumaadka ama diidmada la shaqaynta Fairview ee nidaamka arjiga waxay keeni kartaa diidmo Arjiga Daryeelka Samofalka ah. Haddii, marka la bixiyo dalabka Daryeelka Samofalka, Fairview haddii ay ogaato in macluumaadka lagu bixiyay arjiga Daryeelka Samofalku inuu been yahay, Arjiga Daryeelka Samofalka iyo wixii kale ee deeqda Daryeelka Samofalka ah waa lala noqon doonaa siday kolba Fairview ugu aragto inay munaasab u tahay.

# Siyaasad Caawimaadda Dhaqaalaha Jaantuska C

**La-Shaqaynta Barnaamijka Daryeelka Samofalka iyo Isticmaalka Caymiska**

Maadaama oo aanu Barnaamijka Daryeelka Samofalka aanu beddaleynin mas'uuliyadda shakhsi ahaaneed, dadka dalbanaya kaalmada dhaqaale ee Barnaamijka waxaa looga fadhiyaa inay kala shaqeeyaan nidaamka Fairview ee lagu ogaanaayo u qalanka iyo kaalmada kharashka adeegysada ay ku balaadhinayaan awooda shakhsiga. Fairview waxay ku dhiiri gelisaa shakhsiyaadka leh awooda iibsi ee dhaqaale ee caymiska caafimaad si ay u xaqiijiyaan helitaanka joogtada ah ee adegyadooda caafimaadka kahortagga iyo ilaalinta hantidooda shakhsi ahaaneed. Dhammaan bukaanka waa la baadhaa oo waxay u baahan karaan inay ku dalbadaan MNSure ee ah Medicaid, MinnesotaCare, Caymiska Caafimaadka U-Qalmaha ama qaababka kale ee caymiska caafimaadka la oggol yahay ee lagu sheegey Sharciga Daryeelka La Awoodi (Affordable Care Act, ACA) si loogu arko wada shaqayn, haddii ay ku munaasab tahay.

- Haddii ay macquul tahay in bukaanku uu u qalmo lacag cid kale bixinayso oo aanu bukaan ku soo darin xaalad ka baxsan awoodiisa darteed, waxaa looga baahan yahay bukaanka inuu soo gudbiyo warqad uu ku sharraxayo. Warqada waxaa eegi doona maamulka Fairview.
- Bukaanku u ma qalmaayo Daryeelka Samafalka ama wixii kale ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ah hadii bukaanku uu leeyahay cidkale oo ka bixisa oo aanu u soo gudbin macluumaadka bixiyaha Fairview muddada ku habboon oo waxay keeni karta diidmada Fairview.
- Guud ahaa, hadii bukaanku uu doorto in aanu caymiska ka gelin ee cidda uu shaqeeyo/u shaqayso hadii la heli karo, ma dalban karaan Daryeelka Samofalka. Waa inay ku dalbadaan MNSure Kaalmada Caafimaadka, MinnesotaCare ama Caymiska Caafimaadka U Qalma.
- Haddii uu bukaanku doorto in aanu ku dallicin camyskiisa/keeda daawayn gaar ah ama taariikhda adeegga, booqashadaasi u ma qalmayso Daryeelka Samofalka.

# Siyaasad Caawimaadda Dhaqaalaha Jaantuska D

**Ka Baxsan Barnaamijka Daryeelka Samofalka:**

Barnaamijyada Daryeelka Samofalka Fairview iyo Qorshayaasha Daryeelka Samofalka ma bixiso kuwa soo socda:

- Bukaanka aan u hogaansamin nidaamka arjiga Daryeelka Samofalku waxa uu diidi karaa Daryeelka Samofalka.
- Haddii xisaabta bukaanku uu ku lugu leeyahay shirkad ceymis, Charity Care waa loo diidi doonaa haddii codsadahu uu ku guuldareysto inuu la shaqeeyo sheegashada ama ka qaadashada qolo saddexaad.
- Adeegyada bixiyayaasha Fairview, bixiyayaasha kale ee Fairview kasoo hoos galaan siyaasadan.
- Adeegyada ay qabtaan Xarumaha Caafimaadka Fairview.
- Qarashaadka la xiriira gaadiidka, iyo kharashaadka nolol maalmeedka
- aliinka beddelka unuga wixii kharash ee la xidhiidha wakhtiga qalliinka ilaa hal sano kadib qalliinka bukaanka aan u qalmin qiimo dhimista Daryeelka Samofalka. Wixii talooyin ah habaynta isbeddaladan waa inay soo maraan nidaamka Ka Reebitaanka Dhaqaale.
- Dadka aan haysan dhalashada Maraykanka, dadka aan haysan Deganaanshaha Rasmiga ah, ama dad Maraykanka ah ee degan meel ka baxsan Maraykanku u ma qalmaan Daryeelka Samofalka; waxaa kamid ah bukaanka ku jooga fiisaha iyo ardayda caalamiga ah.  Ku ma jiraan shakhsiyaadka bilaa waraaqaha ah ee degan Maraykanka iyo dadka aan haysan deganaanshaha rasmiga ah. Deganaanshaha rasmiga ah ee Maraykanka/Kaarka cagaaran.
- Xarunta Caafimaadka ee Madaxa Bannaan ee Fairview kama qayb gasho hdii ayna jirin Kaalmada Caafimaad ee gobolka. Markaa, bukaan xarumaha caafimaadka madaxa bannaan ee hel caymiska Medicaid ee ka baxsan gobolka uma qalmaan Daryeelka Samofalka.
- Adeegyada loo arko in ayna badanaa shirkadaha caymisku bixin iyada oo loo arko daryeel caadi ah mooyee.
- Ganacsiyada tafaariiqda ah, Agabka Caafimaadka Guriga Fairview iyo Caafimaadka Lafaha & Waxa Jidhka Lagu Rakibo kuma jiraan caymiskan.
- Daryeelka Guriga Fairview iyo Farmashiga Fairview waxay leeyihiin xeerar Daryeelka Samofalka oo ma bixiyo caymiskani.
- Meelaha ay iskaashiga leeyihiin Fairview waxaa weeye hay'ado madaxbannaan oo ma hoos yimaadaan siyaasadan, sida, laakiin kuma koobna, Fairview Maple Grove Ambulatory Surgery Center, Crosstown Surgery Center, iyo Greenview Alzheimer’s.
- Adeegyada xirfadlayaashu ee lagu bixiyo hay'adaha aan ahayn Fairview waxay hoos yimaadaan barnaamijkaan.

# Siyaasad Caawimaadda Dhaqaalaha Jaantuska A

**Barnaamijka Daryeelka Samofalka - Ikhtiyaaro Qiimo-Dhimis Kale**

- Waxyaabaha Lagasoo Reebey Maaliyadeed
  - Maamulka Fairview ee loo wakiishay waa inay qiimeeyaaa dhamaan wixii lagasoo reebeu si loo ogaado u qalanka bukaanka in laga bixiyo. Kaliya kiisaska qaar bukaanka aan haysan ilo dhaqaale oo ka bixiya ayaa la gudbinayaa oo la gaadhsiinayaa Daryeelka Samofalka. Dhammaan kiisaska kal waa in la gudbiyaa oo loo gaadhsiiyaa habayn maamul ahaan aan ahayn Daryeelka Samofalka ama Dayn Xun, sida lagu sheegey tilmaamaha federalka. Dalbadaha dhaafiya tilmaamaha FPL oo lagu leeyahay dayn caafimaad oo ka badan isugayn dakhliga qoyska sanadkii la soo dhaafay waxaa loo oggolaan karaa inay ku dalbadaan Daryeelka Samofalka Wixii Dhaqaale Ahaan Laga soo Reebo.
- Wadaaga-yaasha Waayeelka
  - Iskaashida Heerka Sare ee Fairview waxaa weeye iskaashi u dhaxeeya Fairview iyo Adeega Bulshada Sare. Fairview waxay oggolaatay inay ka tanaasusho caymis wadareedka iyo wixii laga dhaafayo isbitaalka iyo xarunta caafimaadka. Xubnaha barnaamijkan waxay fahansan yihiin inay ka mas'uul yihiin wixii shayo ah ee aan ku jirin Medicare, sida dawooyinka guriga lagu qaato. Isku-Duwaha Daryeelka  Daryeelka Samofalku waa inay habeeyaan xisaabta. Xaddiga laga qaaday Medicare waa in lagu bixiyaa inta la habeyay ee Daryeelka Samofalka.
  - Codsiyada Isqoridda
    - Dhammaan codsiyada waxaa loo dirayaa kana shaqaynaya Hoggaanka sare ee Adeegyada Bulshada ama saraakiisha shaqadaas leh ee gobalka.  Bukaanku wuxuu codsan karaa foomka codsiga ama xog dheeri ah asagoo wacaaya 952-767-0665 ama booqanaaya www.seniorcommunity.org markuu joga aaga bartamaha ama wacaaya 1-800-662-5711 ama booqanaaya www.aeoa.org/senior-services Si loo siiyo Cabirka.
  - Shuruudaha U Qalanka
    - Bukaanku waa inuu ku jiraa Medicare part A iyo B oo waa in aanu ku jirin caymis badal ah.
    - Ma yeelan karo Medicare-ka dheeraadka ah.

- Daryeelka Samofalka Retro/Daryeelka Samofalka Medically Indigent
  - Haddii bukaanku uu wakhtigan ku jiro MA ama MinnesotaCare iyo dhammaan taariikhaha hore ee adeegyada aanay bixin MA/MinnesotaCare, wixii xisaab ah ee la gelay kahor inta aan la gaadhin taariikhda ansixinta MA ayaa u qalmi kara Daryeela Samofalka.
- Qiimo Dhimista Bilaa Caymiska
  - Marka laga tago barnaamijka lagu heli karo Siyaasada Kaalmada Dhaqaale, dadka degan Minnesota iyo Wisconsin ee bilaa caymiska ah ayaa u qalma qiimo dhmista bilaa caymiska ee adeegyada isbitaalka ee ka horeeyay arjiga qiimo dhimista Daryeelka Samofalka.  Qiimo dhimistani waxay ku salaysan tahay heshiiska Wadajirka ah ee Xeer Ilaaliyaha Guud oo maaha barnaamijka daryeelka samofalka.

# Xeerka Caawimada Dhaqaalaha Jaantuska F

**Kharashaadka iyo**
**Uruurinta**

- Fairview waxay leedahay siyaasad Qaansheegad iyo Lacag ururin oo gaar ah taas oo laga heli karo bogga internetka www.Fairview.org ama iyadoo la wacayo Adeegga Macaamiisha ee Fairview 612-672-6724 ama khadka bilaashka ah ee 1-888-702-4073, Adeegga Macaamiisha HealthEast 651-232 -1100 ama khadka bilaashka ah ee 1-866-770-6411, ama Adeegga Macaamiisha Fairview Range 218-362-6624 ama khadka bilaashk ah ee 1-877-390-6624. Siyaasadan waxaa ku jira macluumaad gaar ah oo ku saabsan: Xeerkaan waxaa ku jira xog dheeri ah oo gaar ah oo ku saabsan:
    - Nidaamka Kharashka: Fairview waxay soo saari doonaan bayaan kharash dalac wakhtiga la sheegey oo waxa uu bixin doonaa ugu yaraan 120 maalmood oo ka bilaabma boqashada kowad kadib inta aan la bilaabin uruurinta gaarka ah ee xisaabta.
    - Xalinta Xisaabaadka: Fairview waxay bixisaa ugu yaraan 240 maalmood si loo xaliyo xisaabta furan ee ikhtiyaarada kala duwan, sida ogaanshaha caymiska u qalma ama kaalmada caafimaad, qorshaha bixinta kharashka, daryeelka samofalka ama qaab kale.
    - Talaabooyinka Uruurinta: Hadii ay dhacdo in la bixin waayo, Fairview waxay u gudbin kartaa hay'adaha uruuriya iyo/ama shirkadaha uruuriya ee sharciga ah wixii daba socodka ah. Fairview waqxay siin doontaa bykanka warglin ugu yaraan ah 30 maalmood oo ka bilaabma inta aan la bilaabin talaabooyinka aan caadiga ahayn ee xisaabta.

**Liiska Bixiyaha**
Fairview wqaxay haysaa liiska dhamaan kooxda bixiyaasha ee bixiya adeegyada xaalada degdega ah iyo kuwa caafimaad ahaan daruuriga ah bukaanka ku sugan xarunta Isbitaalka Fairview. Liiska wixii la shegey in bixiyayaashu inay hoos yimaadaan iyo inayna hoos iman Siyaasada Kaalmada Dhaqaale ee Fairview (eeg linkiga lifaaqa)www.Fairview.org
ama https://www.healtheast.org/images/stories/billing/covered_providers.pdf

**Dhaqan Gelinta Hay'ada:**
Fairview Lakes Medical Center ayaa qaatay siyaasaddaan.
Fairview Northland Medical Center ayaa qaatay siyaasadan.
Xarunta Caafimaadka Fairview Range ayaa qaatay siyaasadan.
Fairview Ridges Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
Fairview Southdale Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
Grand Itasca Clinic & Hospital ayaa qaatay siyaasaddaan.
HealthEast St. John's Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
HealthEast St. Joseph's Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
HealthEast Woodwinds Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
HealthEast Bethesda Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
HealthEast Clinics iyo hay'adaha kale ee Cashuurta laga dhaafay ayaa qaatay siyaasadan.
University of Minnesota Medical Center ayaa qaadatay siyaasadan.
Fairview Medical Group ayaa qaadatay siyaasaddaan.

**Mulkiilaha Siyaasadda:**
Madaxweyne Ku Xigeenka Wareegga Dhakhliga

**Waxaa Ansixiyay:**
Guddiga Maamulka Fairview

**Taariikhda(ha):**

**Taariikhda Dhaqangalka:** 2-18-07, Guddidaa Ansixay

**Beddelaysa –** Heshiiska Dhaqaale ee Gudida Qabta Daryeelka Bulshadu Ansixisay ee Adeegyada Bukaanka 12-16-04

**Taariikhda Dib u Eegida:** 2/1/15; 12/1/15; 12/29/2015; 1/29/2016, 7/24/2017, 6/20/19, 2/10/20, 2/1/21

**Taariikhda Dibu -Eegista Lagu Sameeyay:** Guddida Fairview Waxay Naqdiyeen oo Ay Dib u Ansixiyeen: 4/16/15, 6/17/16, 8/17/17, 11/5/19, 8/5/21

**Taariikhda Dibu-Eegista La Ansixiyay:** 6/1/15, 6/17/16, 11/1/17